WAX KASTA OO AAD U BAAHAN TAHAY IN AAD KA OGAATID DIIWAAN GELINTA COD BIXINTA

JAWAABAHA SU'AALAHA KU SAABSAN DIIWAAN GELINTA COD BIXIYEYAASHA GUDAHA

DIIWAAN GELINTA COD BIXINTA

Xaq ma u leeyahay in aan isku qoro?

Ma leyga saaray in aan isku qoro?

Maxay tahay sababta loo baahan yahay in ley diiwaan geliyo?

Sidee ayaan isu diiwaan geliyaa?

Xaggee ayaan ka helaa foomka diiwaan gelinta?

Ma isku qori karaa marka aan adeegsado internetka?

Ma casriyeyn karaa tafasiisheyda marka aan adeegsado internetka?

Ma isku qori karaa ka hor inta aan gaarin 18 sanno?

Waxaan ahay qof itaal darran. Ma heli karaa kaalmo xagga diiwaan gelinta?

Waxaan dibadda ku leeyahay qoys ama asxaab. Ma ku qori karaa diiwaanka?

Maxuu yahay liiska aan la daabicin?

Maxaa ku dhaca foomkeyga diiwaan gelinta kaddib marka aan dib u celiyo?

Macluumaadkee leyga baahan yahay in aan bixiyo?

DIIWAAN GELINTA MĀORI

Fursadda Cod Bixinta Māori?

Aniga waxaan ahay Māori New Zealand. Sidee ayaan ku doortaa liiska leygu qoro?

Maxaa dhaca haddii qof Māori ah uu marka kowaad isku qoro?

Intee jeer ayaa la qabtaa Fursadda Cod Bixinta Māori?

Aniga waxaan ahay Pacific Islands Polynesian. Ma isku qori karaa liiska Māori?

LIISASKA COD BIXINTA

Maxuu yahay liiska cod bixinta Barlamaanka?

Xaggee ayaan ka arki karaa liiska cod bixinta?

Maxaa loo isticmaalaa macluumaadka cod bixinta?

CASRIYEYNTA TAFASIISHAADA COD BIXINTA

Maxaan sameyaa haddii aan baddalo cinwaankeyga?

Maxaan sameyaa haddii aan baddalo magaceyga ama shaqadeyda?

Maxaa dhaca haddii aan halmaamo in aan casriyeyo tafasiisheyda?

OLOLAHA CASRIYEYNTA DIIWAAN GELINTA

Maxay tahay casriyeynta diiwaan gelinta?

Maxaan sameyaa marka ay socoto ololaha casriyeynta diiwaan gelinta?

Maxaa dhaca haddii aan dib u celinin foomka casriyeynta diiwaankeyga?

Maxaa dhaca haddii aan helo foomka casriyeynta diiwaan gelinta qof aan dagganeyn cinwaanka?

Maxaa dhaca haddii aan helin foomka casriyeynta diiwaan gelinta?

XUDUUDA COD BIXINTA

Aniga ma guurin hase ahatee waxaa leygu wareejiyay xaafad kale. Maxay tahay sababta?

DOOROSHOOYIN KALE

Maxay tahay doorashada Barlamaanka ee lagu baddalo xildhibaanka?

Maxay yahiin doorashooyinka dagmada?

Xaq ma u leeyahay in aan codkeyga ka dhiibto Referendumka Muwaadinka Bilaabo (Citizens Initiated Referenda) iyo/ama Referendumka Dawladda Bilowdo (Government Initiated Referenda)?

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Sidee ayaan ku helaa macluumaad badan?

Luqado kale ma ku heli karaa macluumaadkaan?

WAA IN AAD QORAN TAHAY SI AAD CODKAADA UGA DHIIBATID DOORASHOOYINKA

BARLAMAANKA NEW ZEALAND

UGU YARAAN HAL MAR SADDAXDII SANNO, NEW ZEALAND WAXAA LAGU QABTAA DOORASHO GUUD SI LOO DOORTO BARLAMAAN CUSUB IYO DAWLAD. WAXAA JIRA COD BIXIYEYAAL GUUD IYO MĀORI.

COD BIXIN KASTA WAXAY LEEDAHAY DIIWAAN, AMA LIISKA, QOF KASTA OO KU JIRA DIIWAANKA COD BIXINTA. HADDII AAD GAARTAY 18 SANNO AMA AAD KA WEYN TAHAY, AADNA XAQ U LEEDAHAY IN AAD ISKU QORTID, SHARCIGA WUXUU LEEYAHAY WAA IN AAD KU QORAN TAHAY LIISKA. HADDII AAD GAARTAY 17 SANNO, WAXAAD ISUGU QORI KARTAA SI KU MEEL GAAR AH. KADDIB MARKA AAD ISKU QORTID, WAA IN AAD CASRIYEYSID TAFASIISHAADA. DIIWAAN GELIYEYAASHA COD BIXINTA, EE U SHAQEEYO NEW ZEALAND POST LTD. AYAA LA SOCDO LIISASKA.

HORUDHACA

DIIWAAN GELINTA COD BIXINTA

XAQ MA U LEEYAHAY IN AAN ISKU QORO?

Waxaad u leedahay xaq, waana in aad sharci ahaan isku qortid haddii:

- Aad tahay muwaadin New Zealand ama aad si joogto ah u daggan tahay New Zealand, iyo
- Aad gaartay 18 sanno, ama ka weyn tahay, iyo
- Aad in muddo ah si joogto ah ugu nooleyd New Zealand in ka badan hal sanno, iyo
- Aan lagaa joojinin xaqa aad u leedahay.

MA LEYGA JOOJIYAY IN AAN ISKU QORO?

Iskuma qori kartid haddii:

- Aad tahay muwaadin New Zealand oo ku sugan dibadda New Zealand oo aadan tagin New Zealand saddaxdii sanno ugu dambeysay gudaheeda.
- Aad si joogto ah u daggan tahay New Zealand balse aad ku sugan tahay dibadda New Zealand, aadna tagin New Zealand 12dii bilood ee la soo dhaafay.

(Xasuusin: Waxaa jira waxyaabo ka reeban labada sharci ee kor ku qoran. Tusaale ahaan, shaqaalaha dadweynaha ama xubnaha Ciidanka Difaaca ee ku maqan waajibaadka dibadda New Zealand, iyo sido kale xubnaha ka tirsan qoysaskooda.)

Waxaa jira waxyaabo kale oo aasaas u ah ka joojinta kuwasoo saameyaa dad yar. Diiwaan geliyeyaasha cod bixinta waxaa la ogeysiiyaa dadka ay quseyso asbaabtaas. Haddii aad qabtid su'aalo ama fikrado ku saabsan asbaabta ka-joojinta, wac telefoonka 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) ama fiiri boggena internetka – elections.org.nz.

MAXAY TAHAY SABABTA LOOGU BAAHAN YAHAY IN LEY GELIYO DIIWAANKA?

Waa in aad isku qortid diiwaanka haddii aad xaq u leedahay in aad sidaas sameysid. Isku qoridda waxay ku siisaa fursad aad ku dhiibatid codkaada. Cod bixinta waa fursadda aad u haysatid in aad fikradaada ka jeedisid dadka iyo axsaabta siyaasadda loo doorto Barlamaanka New Zealand marka la gaaro doorasho guud kasta. Waxaad kaloo fursad u haysataa in aad codkaada ka dhiibatid doorashooyinka guddiga dagamada iyo guddiga caafimaadka deegaanka iyo referendum ama cod bixin kasta.

SIDEE AYAAN ISUGU QORI DIIWAANKA?

Buuxi foomka diiwaan gelinta ee lagu magacaabo "Diiwaan gelinta cod bixinta: Arjiga" ("Enrolling to vote: Application"). WAA in aad arji u qoratid diiwaan gelinta liiska cod bixinta, xataa haddii aadan rabin in aad codkaada dhiibatid.

Haddii aad tahay Māori New Zealand, ama aad farac u leedahay Māori New Zealand, aadna isku qoreysid marka kuugu horeyso, waxaad kaloo adeegsan kartaa arjiga si aad u sheegtid liiska aad dooneysid in laguugu qoro. Waxaad dooran kartaa liiska Māori ama midka Guud.

XAGGEE AYAAN KA HELAA FOOMKA DIIWAAN GELINTA?

- Buuxi kuna soo dir boostada kuuboonka ku yaal dabada buugyarahaan kaddibna waxaan kuu soo dirri doonaa mid (Kuboonka wuxuu ku qornaan doona luqadda Ingiriisiga oo keliya).
- Waa lacag la'aan waxaana laga helo PostShop kasta.
- Lacag la'aan naga soo wac telefoonka 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56), kaddibna waxaan kuu soo dirri doonaa mid.
- Lacag la'aan noogu soo dir fariin ku qoran magacaada iyo cinwaankaada una soo dir 3676, kaddibna waxaan kuu soo dirri doonaa mid.
- Codso, ama ka daabaco boggena internetka – elections.org.nz.

Kaddib marka aad buuxisid foomka, ku rid PostShop kasta ama ku soo dir boostada (looma baahna tigidh):

FREEPOST 2 ENROL

ELECTORAL ENROLMENT CENTRE

P O BOX 190, WELLINGTON 6140

MA ISKA DIIWAAN GELIN KARAA INTERNETKA?

Haa, si fudud u tag boggena internetka elections.org.nz kaddibna riix battanka “Diiwaan gelinta, saxidda ama casriyeynta” (“enrol, check or update”). Raac talaabadaha lagu buuxiyo tafasiisha diiwaan gelintaada. Kaddibna waxaad internetka ka soo baxsan kartaa si aad u daabacatid foomka diiwaan gelinta kaasoo horay loogu buuxiyay tafasiishaada, saxiix soona dir si loo dhamaystiro hawsha.

Si kale, waxaad soo gudbin karta codsiga kaddibna waxaan kuu soo diri doonaa foomka diiwaan gelinta adiga kuu gaarka ah ee horay loo daabacay si aad u fiirisid,, saxiixdid, soona celisid. Waxaad tafasiishaada diiwaan gelinta ka fiirin kartaa boggena internetka.

MA CASRIYEYN KARAA TAFASIISHEYDA MARKA AAN ADEEGSADO INTERNETKA?

Qofka wuxuu awood u leeyahay in uu elataroonig ahaan u casriyeeyo tafasiishiisa diiwaan gelinta kaddib marka u buuxiyo, iyo marka Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha uu ogolaado foomka “Diiwaan Gelinta cod bixinta: Arjiga” (“Enrolling to vode: Application”) kaasoo muujiya in ay rabaan in ay ka qeybqaataan adeegaan. Waxaa kaloo loo baahan yahay cinwaanka emailka arjiilaha.

Casriyeynta elatarooniga ee tafasiisha diiwaan gelinta waxaa laga gala bogga igovt kaasoo u fasaxa in la adeegsado isla tafasiisha lagu galo si loo helo adeegyada kala duwan ee dawladda – igovt waa amaan waxayna xafidaa asturnaantaada.

Kaddib marka laga shaqeeyo diiwaan gelintaada, waxaa lagaala soo xariiri doonaa cinwaanka emailka ku qoran foomkaada diiwaan gelinta si diiwaan gelinta looga dhamaystiro adeegga internetka. Tan waxay kaaga baahan doontaa in aad samaysatid xarfaha lagu galo, ama in aad adeegsatid xarfaha lagu galo haddii aad horay mid u lahayd.

Haddii aad go’aansatid in aadan rabin in aad awood u yeelatid in aad elataroonig ahaan u casriyeysatid tafasiishaada diiwaan gelinta, waa in aad soo ogeysiisid Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha in aad iska dhaaftay fursadda codsiga elatarooniga. Gelitaanka xogta diiwaankaada waxaa loo baddali doonaa sida aad u dalbatay.

MA ISKU QORI KARAA KA HOR INTA AAN GAARIN 18 SANNO?

Haa, waxaad isugu “qori kartaa si ku meel gaar ah” isla marka aad gaartid 17 sanno marka aad buuxisid foomka diiwaan gelinta. Marka aad gaartid 18 sanno, si toos ah ayaa laguu gelin doonaa diiwaanka.

Macluumaad badan waxaa laga heli karaa buugyarahena lagu magacaabo “Diiwaan gelinta cod bixinta ka hor inta aan la gaarin 18 sanno” (“Enrolling to vote before you’re 18”). Waxaa laga heli karaa PostShop kasta ama wac telefoonka 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) si laguugu soo diro mid.

ANIGA WAXAAN AHAY QOF ITAAL DARRAN. MA HELI KARAA KAALMO XAGGA DIIWAAN GELINTA?

Haddii aad jir ahaan u itaal darran tahay, aadna u baahan tahay kaalmo xagga buuxinta iyo soo celinta foomkaada diiwaan gelinta, waxaad sameyn kartaa sida soo socota:

- Foomkaada waxaa kuu buuxin kara kuuna saxiixi kara cod bixiye ku jira diiwaanka. Waa in ay foomkaada ku daabacaan, meesha ku xigta saxiixooda “Cod Bixiye Itaal Darran – amarkooda lagu saxiixay” (“Elector Physically Disabled – signed by their direction”.

- Ama waxaa foomka kuu buuxin kara, kuuna saxiixi kara, qof adiga kaa haysta Awoodda Qareenka (Power of Attorney). Waa in ay foomka ku daabacaan, meesha ku xigta saxiixooda “Cod Bixiye Itaal Darran – Awoodda Qareenka” (“Elector Physically Disabled – Power of Attorney”)

Haddii xubin ka tirsan qoyskaada uu madaxa ka itaal darran yahay, waad ku qori kartaa diiwaanka. Lacag la’aan naga soo wac telefoonka 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) si aad u heshid tafasiil.

WAXAAN DIBADDA KU LEEYAHAY QOYS AMA ASXAAB. MA GELIN KARAA DIIWAANKA?

Haa. Haddii ay weli xaq u leyahiin in ay isku qoraan, waxaa dhici karto in aad awood u yeelatid in aad u buuxisid foomkooda diiwaan gelinta. Waxaad sameyn kartaa sida soo socota:

- Haddii aad tahay cod bixiye ku jira diiwaanka, waxaad buuxin kartaa foomkooda kaddibna saxiix. Waa in aad ku daabacdid foomka, meesha ku xigta saxiixaada “Cod Bixiye ku Sugan Dibadda – amarkooda lagu saxiixay” (“Elector Overseas – signed by their direction”).
- Ama, haddii aad iyaga ka haysatid Awooda Qareenka (Power of Attorney), waad buuxin kartaa foomkooda, waadna saxiixi kartaa foomkooda. Waa in aad ku daabacdid foomka, meesha ku xigta saxiixaada “Cod Bixiyaha ku Sugan Dibadda – Awoodda Qareenka” (“Elector Overseas – Power of Attorney”).

MAXUU YAHAY LIISKA AAN LA DAABICIN?

Haddii aad aaminsan tahay in xogta tafasiishaada ku daabacan liiska ay halis gelin karto amaankaada shakhsiga, waxaad codsan kartaa in tafasiishaada aysan ka muuqanin liiska la daabacay. Waxaad u baahan tahay in aad sameysid arji gaar ah iyo in aad soo saartid caddeyn ku saabsan xaaladaada shakhsiga, sida amarka badbaadinta (protection order), amarka ka-celinta (restraining order), ama amarka uu soo saaro sarkaal ka tirsan boliiska.

Macluumaad badan iyo foomka arjiga waxaa laga heli karaa buugyarahena lagu magacaabo “Wax kasta oo aad u baahan tahay in aad ka ogaatid liiska cod bixinta aan la daabicin” (“Everything you need to know about the unpublished electoral roll”). Waxaa laga helaa PostShop kasta ama wac telefoonka 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) si laguugu soo diro mid.

MAXAA KU DHACA FOOMKEYGA DIIWAAN GELINTA KADDIB MARKA AAN DIB U SOO CELIYO?

Diiwaan Geliyaha Cod Bixinta ayaa fiirin doono si loo hubsado in si sax ah loo buuxiyay. Haddii ay sidaas tahay, magacaada waxaa la gelin doonaa liiska cod bixiyeyaasha meesha aad markii ugu dambeysay ku nooleyd ugu yaraan hal bil. Waxaan boostada kuugu soo dirri doonaa ogeysiis si loo xaqiijiyo diiwaan gelintaada.

MACLUUMAADKEE LEYGA BAAHAN YAHAY IN AAN BIXIYO?

Fadlan ka jawaab dhamaan su’aalaha ku yaal foomka diiwaan gelinta si aan si sax ah kuu gelino diiwaanka. Qoraalka ku calameysan xiddiga (*) oo keliya ayaa lagu daabici doonaa liiska cod bixinta.

*MAGACAADA BUUXA:

Waa loo baahan yahay si loo fiiriyo in si sax ah laguu geliyay diiwaanka, iyo si loo kala saaro dadka isku magaca ah xagga qoyska ama qaba magacyada isla midka ah.

TAARIIKHDA DHALASHADA:

Waxay Diiwaan Geliyaha Cod Bixinta u muujisaa in aad gaartay da’da diiwaan gelinta, waxay kaloo nagu kaalmeysaa in aan kala saarno dadka isku magaca leh.

SAXIIXA IYO TAARIIKHDA:

Haddii aad tahay Māori New Zealand, ama aad leedahay faraca Māori New Zealand, WAA in aad saxiixdid kuna qortid taariikhda qeybta Māori ama qeybta Guud. WAA IN AADAN SAXIIXIN LABADA. Waxaa muhiim ah in aad si taxadir leh u dooratid liiska aad doonesyid in laguugu qoro. Dhamaan dadka kale waa in ay saxiixaan qeybta Guud kuna qoraan taariikhda. Haddii aad jir ahaan u itaal darran tahay ama aad ku sugan tahay dibadda, waxaa arjiga kuu saxiixi kara qof adiga ku mattala.

*CINWAANKA MEESHA LA DAGGAN YAHAY:

Waa cinwaanka gurigaada. Kuma filna Sanduuqa Boostada New Zealand ama nambarka miyiga si loo tilmaamo cinwaankaada. Waxaan u baahanahay cinwaankaada buuxa si aan kuugu qorno cod bixinta meesha aad adiga

“daggan” tahay.

Waxaad “daggan” tahay meesha aad u dooratay in uu kuu noqdo gurigaada maxaa yeelay waxaad meeshaas ku leedahay qoys ama xariirka shakhsiga ama waxaa jira asbaab shakhsi ahaan kuu gaar ah. In aad meeshaas ka maqnaatid mar mar ama muddo gaaban macnaheeda ma aha in aadan dagganeyn meeshaas. In aad ka maqan tahay meesha aad daggan tahay taasoo ugu wacan shaqadaada ama waxbarashadaada (ama shaqada ama waxbarashada xaaska) ma saameyso taas. Qodobka ugu muhiimsan xagga meesha aad daggan tahay waa meesha aad u dooraty in ay kuu noqoto gurigaada.

CINWAANKA BOOSTADA:

Waa loo baahan yahay haddii cinwaankaada boostada ka duwan yahay cinwaankaada guriga. Waxaan u baahanahay in aan kuu soo qorno si loo xaqiijiyo diiwaankaada.

*SHAQADA:

Waxay nagu kaalmeyn kartaa in aan kala saarno dadka isla magaca qaba. Badanaa si la soo gaabiyay ayay uga muuqan kartaa liiska la daabaco

SI ELATAROONIK AH U CASRIYEY TAFASIISHA MUSTAQBALKA:

Haddii aad dooneysid in aad si elatarоonik ah u casriyeysid tafasiishaada mustaqbalka, adiga oo aan buuxinin foomka, calamee goobada “Yes” kaddibna emailkaada ku muuji Qeybta D, dhanka dambe foomka.

MA TAHAY MĀORI?

Māori New Zealand, ama faraca Māori New Zealand, oo keliya ayaa ka jawaabi karo marka ay calameyaan goobada “Yes”. Dhamaan dadka kale waa in ay calameyaan goobada “No”.

NAMBARADA TELEFOONKA:

Waa loo baahan yahay haddii loo baahdo in laguula soo xariiro.

KHARIIDADA:

Haddii aad ku nooshahay cinwaan aan nambar lahayn, waxaa loo baahan yahay khariida muujineysa meesha uu ku yaalo gurigaada si loo ogaado qeybta aad codkaada ka dhiiban kartid.

MA BADDASHAY CINWAANKAADA DHAWAANAHAAN?

Haddii aad cinwaanka guriga aad daggan tahay ku nooleyd in ka yar hal bil, fadlan buuxi qeybahaan.

MUWADINIINTA NEW ZEALAND EE DIBADDA KU SUGAN:

Waa in aad soo buuxisid qeybahaan oo keliya haddii aad ku sugan tahay dibadda. Fadlan daabac markii ugu dambeysay ee aad ku nooleyd New Zealand, marka aad u guurtay dibadda, iyo cinwaankaadii ugu dambeyay ugu yaraan hal bil ka hor inta aadan ka tagin New Zealand.

DIIWAAN GELINTA MĀORI

FURSADDA COD BIXINTA MĀORI?

Haddii aad tahay Māori New Zealand, ama aad farac u leedahay, waxaad dooran kartaa in lagu geliyo liiska Māori ama liiska Guud.

ANIGA WAXAAN AHAY NEW ZEALAND MĀORI. SIDEE AYAAN U DOORAN KARAA IN LEYGU QORO LIIS?

Guud ahaan, shan sanno kasta, qof kasta oo ku jira liiska cod bixinta ee sheegtay in ay farac u leeyahiin Māori New Zealand, waxaa loo diraa foomka Fursadda Cod Bixinta Māori (Māori Electoral Option). Foomkaan waxaa loo adeegsadaa in lagu doorto haddii aad rabtid in lagu geliyo liiska Māori ama liiska Guud. Tan waxaa lagu magacaabaa habka Fursada Cod Bixinta Māori (Māori Electoral Option).

MAXAA DHACA HADDII AAN AHAY MĀORI OO ISKU QORAAYO MARKII UGU HOREYSAY?

Waxaad dooran kartaa nooca liiska aad dooneysid in aad gashid haddii aad tahay Māori New Zealand, marka aad saxiixdid qeybta ku habboon ee ku qoran foomka diiwaan gelinta. Marka aad dooratid ma baddali kartid ilaa laga gaaro Fursadda Cod Bixinta Māori (Māori Electoral Option).

INTEE JEER AYAA LA QABTAA FURSADDA COD BIXINTA MĀORI?

Fursadda Cod Bixinta Māori waxaa guud ahaan la qabtaa hal mar shantii sanno muddo afar bilood kaddib marka la qabta tirokoobka dadweynaha iyo meelaha la daggan yahay, taasoo cod bixiyeyaasha Māori siisa fursad ay ku fiiriyaan kuna baddalaan nooca liiska ay ku qoran yahiin.

ANIGA WAXAAN AHAY PACIFIC ISLANDS POLYNESIAN. MA LEYGU QORI KARAA LIISKA MĀORI?

Maya. Waxay ku kooban tahay oo keliya Māori New Zealand iyo faraca Māori New Zealand. Māori-ga Cook Islands iyo jasiiradaha Pacific Islands ee xaqa u leh in la diiwaan geliyo waxaa lagu qoraa liiska Guud.

Waxaad macluumaad badan ka heli doontaa buugyarahena lagu magacaabo “Diiwaan gelinta cod bixinta Māori-ga New Zealand”.

LIISASKA COD BIXINTA

MAXUU YAHAY LIISKA COD BIXINTA BARLAMAANKA?

Liiska waa buug soo taxa qof kasta oo ku jira diiwaanka cod bixinta. Waxaa ka mid ah magacyadooda, cinwaanada meelaha ay daggan yahiin iyo shaqooyinka. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu fiiriyo. Sannad kasta waxaa la daabacaa mid cusub, marka laga reebo sannooyinka doorashada Barlamaanka. Sannoyinkaas, labo ayaa la daabacaa; midka kowaad waxaa loogu talogalay in qof kasta uu iska fiiriyo in si sax ah loogu qoray liiska, midka labaad waxaa loo adeegsadaa Maalinta Doorashada.

XAGGEE AYAAN KA ARKI KARAA LIISKA COD BIXINTA?

Diiwaan Geliye kasta oo ka tirsan xafiiska Cod Bixiyeyaasha iyo maktabka dadweynaha wuxuu haystaa dhamaan liisaska New Zealand. Sidoo kale, PostShop kasta waxay haysataa koobiyada liiska Guud iyo liiska Māori ee xaafadooda. Inta badan PostShop-yada waweyn waxay sidoo kale haystaan liisaska cod bixinta xaafadaha.

Si kale, waxaad tafasiihaada diiwaan gelinta ka fiirin kartaa boggena internetka - elections.org.nz.

MAXAA LOO ADEEGSADAA MACLUUMAADKA COD BIXINTA?

Marka aad isku qortid diiwaanka, magacaada, cinwaanka aad daggan tahay iyo shaqadaada oo keliya ayaa ka muuqan doonto liiska daabacan ee xaafadaada. Dokumentigaan waxaa baari kara xubin kasta oo ka tirsan dadweynaha. Macluumaadkaan marka lagu darro da’daada, cinwaankaada boostada ama faracaada Māori (haddii lagu dabaqi karo), waxaa dhici karto in la siiyo cilmi baareyaasha caafimaadka, musharaxiinta, xubnaha Barlamaanka ama axsaabta siyaasadda. Macluumaadka waxaa kaloo la siiyaa guddiyada deegaanka xagga doorashooyinkooda guddiga caafimaadka dagmada, referendum-yada iyo cod bixinta kale. Liisaska waxaa kaloo laga sameyaa macluumaadka cod bixinta.

CASRIYEYNTA TAFASIISHAADA DIIWAAN GELINTA

MAXAAN SAMEYAA HADDII AAN BADDALO CINWAANKEGYA?

Ka hor inta aadan guurin, waxaad foomka “Codsiga Dib u Toosinta Warqadaha” (“Mail Re-direction Request”) ee Boostada New Zealand ka buuxisaa PostShop kasta. Warqadahaada waxaa laguugu soo dirri doonaa cinwaankaada cusub, intaas waxaa dheer in Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha la ogeysiin doono in aad guurtay.

Haddii cinwaankaada cusub uu weli ku sugan yahay isla xaafadda, Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha ayaa casriyeyn doono liiska, wuxuuna kuu soo dirri doonaa ogeysiis cusub oo xaqiijin ah.

Hase ahatee, haddii aad u guurtay xaafad cusub, waxaa laguu soo dirri doonaa foomka diiwaan gelinta shakhsiga ee horay loo daabacay, si aad u fiirisid, saxiixdid soona celisid. Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha xaafadaada, kaddib marka u helo foomkaada saxiixan, ayuu kugu qori doono kuuna soo dirri doono ogeysiis cusub oo xaqiijin ah.

Haddii Diiwan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha aysan magacaada ka helin liisaska, waxay cinwaankaada cusub kuugu soo dirri karaan foomka diiwaan gelinta.

Si kale, waxaad foomka cusub oo diiwaan gelin ah ka buuxin kartaa boggena internetka - elections.org.nz – waxaad cinwaankaada ka casriyeyn kartaa internetka.

MAXAAN SAMEYAA HADDII AAN BADDALO MAGACEYGA AMA SHAQADEYDA?

Haddii aad baddashid magacaada ama shaqadaada, waa in aad qoraal ahaan u sheegtid Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha isbaddalka dhacay sida ugu dhaqsiyaha badan. Si kale, waxaad foom cusub oo diiwaan gelin ah ama casriyeynta tafasiishaada ka buuxin kartaa boggena internetka – elections.org.nz.

MAXAA DHACA HADDII AAN HALMAAMO IN AAN CASRIYEYO TAFASIISHEYDA?

Haddii aad halmaamtid in aad casriyeysid tafasiishaada, waxaa dhici karto in aysan noo suurtogelin in aan kula soo xariirno inta uu socdo ololaha casriyeynta diiwaan gelinta, waxaana dhici doonto in magacaada laga saaro liiska. Kaddibna waxaad u baahan doontaa in aad dib isu soo gelisid diiwaanka.

OLOLAHA CASRIYEYNTA DIIWAANKA

MAXUU YAHAY OLOLAHA CASRIYEYNTA DIIWAANKA?

Sannad kasta, kumanaan dadka New Zealand ayaa wax ka baddala noloshooda. Waxay ka guuraan gurigooda, wey guursadaan, waxay baddalaan shaqadooda. In badan ayaa ka soo noqda dibadda. Mar mar, isbaddaladaan ma ogeysiiyaan Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha.

Waa sidaas sababta aan muddo ka muddo u qabano ololaha casriyeynta diwaanka. Qof kasta waa in uu fiiriyo iyo casriyeyo, haddii loo baahdo, tafasiishooda si Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha ay dhamaan isbaddalada ugu daraan liisaska cusub ee cod bixinta.

MAXAAN SAMEYAA MARKA LA QABTO OLOLAHA CASRIYEYNTA DIIWAAN GELINTA?

Waa in aad fiirisid aadna baddashid, haddii loo baahan yahay, tafasiishaada diwaanka. Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha ayaa fududeeyo marka uu qof kasta u soo diro foom ku saabsan liisaska duugga. Casriyeynta diiwaankaada wuxuu muujin doonaa tafasiishaada shakhsiga sida loo qoray. Waxaa jira meelo aad ku saxi kartid. Kaddibna saxiix foomka kuna qor taariikhda kaddibna ku soo dir baqshadda ku dhex jirta. Haddii dhamaan tafasiishaada sax yahiin, uma baahnid in aad ka soo jawaabtid, waxaadna ku sii jiri doontaa diiwaanka, tafasiishana waxay ka muuqan doonaan foomkaada casriyeynta diiwaanka.

MAXAA DHACA HADDII AAN DIB U SOO CELININ FOOMKEYGA CASRIYEYNTA DIIWAANKA?

Waxaad ku sii jiri doontaa liiska, isla tafasiishana waxay ka muuqan doonaan foomka casriyeynta diiwaanka.

MAXAA DHACA HADDII AAN HELO FOOMKA CASRIYEYNTA DIIWAANKA EE QOF AAN DAGGANEYN CINWAANKA?

Waa in aad ugu dirtid cinwaankooda cusub ama, haddii aan taas la aqoonin, ku qor baqshadda “Tagay lama yaqaan cinwaanka” kaddibna dib ugu celi boostada. Waxaa loo celin doonaa Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha kaasoo magaca qofka ka saari doono liiska.

MAXAA DHACA HADDII AAN HELIN FOOMKA CASRIYEYNTA DIIWAANKA?

Waa in aad buuxisid foom cusub oo diiwaan gelin ah. Marka Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha uu helo foom cusub aad u soo buuxisay diiwaan gelinta, magacaada wuxuu ka muuqan doonaa liiska cod bixinta.

XUDUUDA COD BIXINTA

ANIGA MA GUURIN HASE AHATEE WAXAA LEYGU QORAY MEEL KALE, MAXAY TAHAY SABABTA?

Meel kasta oo laga cod bixiyo waa in laga helo isla tiro dad ah. Hase ahatee, meelaha qaar waa yaraan karaan, meelaha qaarna waxaa ku soo badan kara dadka, kaddibna waxaa dhici karto in la balaariyo xuduuda.

Guud ahaan, shantii sanno, kaddib marka la qabto tirokoobka dadka iyo guryaha, xuduuda dhamaan goobaha cod bixinta ayaa la fiiriyaa. Haddii isbaddal lagu arko goobaha cod bixinta, waxaa dhici karto in la baddalo xuduuda si loo simo goobaha cod bixinta, loona qiyaaso isla tirade dadka ku nool. Xuduudaan cusub ayaa kaddib loo adeegsadaa doorashada xigta.

DOORASHOOYINKA KALE

MAXUU YAHAY DOORASHADA LAGU BADDALO XILDHIBAANKA BARLAMAANKA?

Mar mar waxaa dhacda in uu banaan noqdo kursi mattala xaafad ka tirsan Barlamaanka inta u dhexeyso Doorashooyinka Guud. Markaas, dadka ka jira xaafadaas waxay fursad u helaan in ay codkooda ka dhiibtaan Xubin cusub oo soo gala Barlamaanka. Tan waxaa lagu magacaabaa doorashada lagu baddalo. Xaafadaas waxaa loo soo saari doonaa liis casriyeysan oo ka kooban cod bixiyeyaasha.

MAXAY YAHIIN DOORASHOOYINKA DEEGAANKA?

Marka aad isku qortid doorashada Barlamaanka, waxaa si toos ah laguugu qoraa liiska guddiga deegaanka. Tan macnaheeda waxay tahay in sido kale ka cod bixin kartid doorashooyinka guddiga deegaanka iyo doorashooyinka guddiga caafimaadka dagmada. Waxaa ka mid ah doorashada duqa magaaladaada ama dagmada, iyo xubnaha adiga kaa mattala guddiga gobolka, guddiga magaalada ama dagmada, guddiga bulshada, guddiga caafimaadka dagmada iyo qaar ka mid ah qeybaha kale sida amaanada shattiyada bixisa.

ANIGA XAQ MA U LEEYAHAY IN AAN CODKEYGA KA DHIIBTO REFERENDUMKA MUWADINIINTA BILOWDO IYO/AMA REFERENDUMKA DAWLADDA BILOWDO?

Marka aad ku qoran tahay doorashada Barlamaanka, waxaad si toos ugu qoran tahay in aad codkaada ka dhiibatid Referendumka Muwadiniinta Bilowdo iyo/ama Dawladda Bilowdo.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

SIDA LOO HELO MACLUUMAAD BADAN?

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaan gelinta cod bixinta waxaa la heli karaa marka la:

- booqdo boggena internetka elections.org.nz
- la waco telefoonka lacag la'aanta 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56)
- la akhristo buugaagta yaryar
  - Wax kasta oo aad u baahan tahay in aad ka ogaatid liiska cod bixinta aan la daabicin (Everything you need to know about the unpublished electoral roll*)
  - Diiwaan gelinta cod bixinta ka hor inta aan la gaarin 18*(Enrolling to vote before you're 18*)
  - Diiwaan gelinta cod bixinta qofka u dhashay Māori New Zealand (Enrolling to vote as a New Zealand Māori)*, buugyarahaan wuxuu ku qoran yahay Ingiriisi iyo Maori

*laga heli karaa PostShop ama Diiwaan Geliyeyaasha xafiisyada Cod Bixiyeyaasha.

WAAD KU MAHADSAN TAHAY IN AAD AKHRISAY BUUGYARAHAAN.

WAXAAN RAJEYNEYNAA IN UU KA JAWAABAY DHAMAAN SU'AALAHAADA KU SAABSAN DIIWAAN GELINTA COD BIXINTA.

HADDII AAD U BAAHAN TAHAY KAALMO BADAN, BOOQO

ELECTIONS.ORG.NZ AMA NOO SOO DIR TELEFOONKA LACAG LA'AANTA

AH EE 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56)

LUQADO KALE MA KU HELI KARAA MACLUUMAADKAAN?

Waxaad boggena internetka ka heli kartaa buugyarahaan oo ku qoran dhowr luqado.

Electoral Enrolment Centre
New Zealand Post Limited
P O Box 190
Wellington 6140

Telefoon:	0800 ENROL NOW (0800 36 76 56)
Faks:	(04) 801 0709
Email:	enrol@elections.org.nz
Bogga Internetka:	elections.org.nz